# Laaxinjire: qorme kombuyuutar oo kuu saxaya maansada

*W/d. Cabdiraxmaan Faarax Guri Barwaaqo*

**1. Hordhac:**

Intaan afka la qorin waxa maansada Soomaaliyeed loo kala saarijirey hibakeentay, hawlikeentay iyo hibashakeentay. Dulucda oo ah qof aan hibo Eebbe u siin, ama hawli ka keenin, ama hibasho darteed la halaanhalini ma haweysanjirin. Waxana adkayd in wax uu tiriyey mid ka mid ah qolooyinkaasi lagu yidhaa laaxin baa ku jira. Maansooyinka la soo ururiyey gef inuu ku jiro iyo in kale lama sheego. Tu la curshayna hadalkeeda daa. Waxa taasi ka daran sida laysugu murginjirey jaadadka badaha maansooyinka Soomaaliyeed. Waxad arkaysaa jiifto gabay lagu sheegayo, ama geeraar gabay lagu tilmaamayo.

Waxaannu haddaba qoraalkan kaga warrami wixii uu qoraalku soo kordhiyey, annaga oo si gaar ah u tilmaami doonna aragtida Miisaanka Maansada waxtarkeeda iyo sida aan wax looga taransan. Waxa kale oonnu sheegi sida ay u tahay agabka ugu habboon ee ilaa maanta loo hayo wax ka qabashada dhibaatooyinkaasi aannu kor ku soo tibaaxnay. Ugu dambaynta waxannu idin hogatusaalayn sida loogu baahan yahay in aragtidaasi loo casriyeeyo looguna rogikaro qorme kumbuyuutar oo uu qofkastaaba si fudud ugu adeegankaro sixidda maansooyinka iyo kala asooridda badaha intaba.

**2. Wixii uu qoraalku soo kordhiyey:**

Dhawr gu' kolkii uu afku qornaaba waxtarkiisa waa la dareemay. Fidintii afka ka sokow waxbadan oo waxtar leh baa la qabtay ama la soo bandhigay. Inta la soo bandhigay waxa sarkoraadka ah aragtidii miisaanka maansada. Sidaad la wada socotaan, 17kii bishii Jeenawari ee 1976dii ayuu Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye' uu aragtidaasi ku soo bandhigay wargeyskii la odhanjirey Xiddigta Oktoobar. Qoraalkaasi oo runtii ahaa mid xiiso badan ka dhex aloosay bulshada laguna tilmaamikaro inuu ahaa yaabkii qarnigii innaga tegey ee dhanka af Soomaaliga, wuxu Gaarriye markii u horreysey ku sheegay xeerarka xeeriya

maansada Soomaaliyeed iyo laaxinka la sheegaa waxa uu yahay intaba. Tusaale ahaan, wuxu innoo sheegay in kolka ay maanso yeelato qaab dhismeedka hoos ku qoran inay tahay jiifto sagaalley ama tobanley:

*Xalay gelin dhexaadkii*
1 2 1 1 (**1**) 2 2 = 10
*Geyigaba dhammaantii*
1 1 1 1 (**1**) 2 2 = 9
*Maran goobay keligey*
1 1 2 (**1**) 1 1 2 = 9

Sida kor ka muuqata, tuduc kasta waxa la tirinayaa inta shaqal ee ku jirta. Shaqalka gaaban waxa loo tirinayaa 1. Ka dheerna 2. Dhafanayaasha sida 'ay, oy, ey ama aw, iyo ow' mar waxa loo tirinayaa 2 shaqal marna 1 shaqal. Halka shaqal (1) ee labada bilood ku dhexjira *xundhur* baa la yidhaa. Sida idiin muqata, Jiifto sagaalleyda xundhurta afar shaqalna way ka hor marayaan afarna way ka dambaynayaan. Halka Jiifto tobanley ay xundhurta shan shaqal ka hormarayaan, afarna ka dambaynayaan. Isaga oo qoraagu tilmaamaya sida uu xidhiidhku uga dhexeeyo maansooyinka wuxu yidhi, " Markasta oo aad shaqal ku kordhiso ama ka jarto jiiftadaasi waxaad ku turunturroonaysaa hees cusub oo hor leh."

Laba gu' iyo badh kadib (Juun, 1978kii) waxa arrintaasi wax ka qoray aqoonyahanka Soomaaliyeed ee la yidhaa Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale'. Carraale dhan kale ayuu uga wareegay. Waxa uu tilmaamay in, halka uu Gaarriye ka tirsanayo shaqallada, uu isagu ka tirsanayo alannadana. Hayeeshee, shaqalladana kama tegayo ee bal tusaalahan fiiri:

Geyigaba dhammaantii 7,2 *
Maran goobay keligey 7, 2

Cabdillaahi Diiriye waxba kama sheegin xidhiidhka ka dhexeeya jaadadka kala duwan ee badaha maansooyinka.

*Tuduca koobaad wuxu ka kooban yahay 7 alane oo ay laba laba shaqal dheere yihiin.

Waxa isna arrintaasi qalinka u qaatay Dr. John William Johnson oo loo yaqaan "Heello". Dr. Heello wuxu taageeray aragtida Cabdillaahi Diiriye. Waxaanu u faahfaahiyey si aad u cilmiyeysan. Waxaanu tilmaamay sida ay aragtidaasi iyo ta Giriiggu isugu dhaw yihiin. Dr. Heello qudhiisu ma tibaaxin wax xidhiidh ah oo ka dhexeeya badaha maansooyinka.

Galbeedka Soomaaliya aqoonyahanno reer Jabbuutiya ayaa wax ka qabashada hawshan dhankooda kaga soo biiray oo dadaal xoog leh muujiyey. Waxay ayana wax ka tilmaameen sida loo miisaamayo maansooyinka gaaggaaban ama maanso hawleedda. Isku soo wada xooriyoo aqoonyahannadaasi umay arag xidhiidhkaa ka dhexeeya maansooyinka in loo qorikaro qaab xisaabeed la raacikaro. Waxa kale oo aanay dareemin, kana hadal, in miisaanku yahay agab loo adeegsankaro saxidda iyo kala asooridda badaha maansooyinka Soomaaliyeed.

## 3. Xidhiidhka ka dhexeeya badaha maansooyinka iyo sida loogu qorikaro qaab xisaabeed la raacikaro:

Kolka aad u fiirsato xidhiidhka ka dhexeeya badaha maansooyinka waxad dareemaysaa inuu jiro qaab dhismeed ku salaysan qaaciidooyin. Tusaale ahaan:

**A.** Haddii jiifto (sagaalley ama tobanley) hal shaqal oo gaaban gadaal lagaga daro waxa innoo soobaxaysa heesta haanta loogu heeso kolka caanaha la lulayo ama ta maqasha dacawada lagaga jiro. Tusaale ahaan:

Haanyahay qaboy qooryar
2 1 1 (1) 2 2 **1**
*Laba qaar laguu kala jar*
1 1 2 (1) 2 1 1 **1**

Arrintaasi waxa loo qori karaa qaab xisaabeedkan hoos ku qeexan:

$$\mathbf{J_{sagaalley\ ama\ tobanley} + 1 = H_{haanta}} \quad \textbf{ama}$$
$$\mathbf{H_{haanta} - 1 = J_{sagaalley\ ama\ tobanley}}$$

**B.** Haddii mar kale Jiifto (sagaalley ama tobanley) hal shaqal oo dheer gadaal lagaga daro waxa innoo soo baxaysa heesta lagu heeso kolka cawska la samaynayo. Tusaale ahaan:

Cawskanaw sabool diidow
2 1 1 (1) 2 2 **2**

Waqaan suuqa lagu dhiginoon
1 2 2 (1) 1 1 1 1 2

Tanna waxa loo qori karaa sidan hoos ku qeexan:

$\mathbf{J_{sagaalley\ ama\ tobanley} + 2 = H_{cawska}}$ **ama**
$\mathbf{H_{cawska} - 2 = J_{sagaalley\ ama\ tobanley}}$

C. Haddii hal shaqal oo gaaban laga jaro jiiftadii waxa innoo soo baxaysa heesta maydhaxda lagu diirto. Tusaale ahaan:

Naa laago laago
2 2 (1) 2 1
Naa laan galoola
2 2 (1) 2 1

Oon weli la diiran
2 1 1 (1) 2 1
Naa mayla diiran?
2 2 (1) 2 1

Waxa tanna loo qori karaa sidan hoos ku qeexan:

$\mathbf{J_{sagaalley\ ama\ tobanley} - 1 = H_{maydhaxda}}$ **ama**
$\mathbf{H_{maydhaxda} + 1 = J_{sagaalley\ ama\ tobanley}}$

**D.** Heesta maydhaxda haddii aan hal shaqal oo gaaban ka jarno (ama aan jiifto sagaalley iyo tobanleyba ka goyno hal shaqal oo dheer) waxa innoo soo baxaysa heesta maqasha.Tusaale ahaan:

Waxan ahay qoraa
1 1 1 1 (1) 2

Murtidaan qalaa
1 1 2 (1) 2

Kala qaybiyaa

1 1 2 (1) 2

Qaarba meel dhigaa

2 1 2 (1) 2

Tanna miyaan sidan hoos ku qeexan loo qori karin?

$$\mathbf{H_{maydhaxa} - 1 \quad ama \quad J_{sagaalley\ ama\ tobanley} - 2 = H_{maqasha}}$$

**E.** Haddii heestaa maqasha saddexda shaqal ee u dambeeya laga jaro waxa innoo soobaxaysa heesta hadhuudhka lagu tumo. Tusaale ahaan:

| | |
|---|---|
| Mooyaha | Tibahana |
| 2 1 1 | 1 1 1 1 |
| Malablaha | Culusiyo |
| 1 1 1 1 | 1 1 1 1 |
| Magacii ? | Cabban baa |
| 1 1 2 | 1 1 2 |
| Mooyaan | La yidhaa |
| 2 2 | 1 1 2 |




Tan qudheeda sidan hoos ku qeexan baan u qorikarraa:

$$\mathbf{H_{maqasha} - 3 = H_{hadhuudhka} \quad ama}$$

$$\mathbf{H_{hadhuudhka} + 3 = H_{maqasha}}$$

**F.** Qaab dhismeedka heesta haanta lagu lulo haddii la laban laabo waxa innoo soo baxaya gabay. Tusaale ahaan:

Adhi waa dhallaan iyo haween dhimiradiisiiye

$$\left\{1\ 1\ 2\ (1)\ 2\ 1\ 1\ \mathbf{1}\right\}\left\{2\ 1\ 1\ (\mathbf{1})\ 2\ 2\ \mathbf{1}\right\}$$

Kaasi oo isna u qorikarno sidan:

$$\mathbf{H_{haanta} + H_{haanta} = Gabay = 2H_{haant}}$$

Xidhiidhkaasina qaab garaaf ahaaneed baa loo muujin karaa sida ka muuqata sawirka kore

**G.** Sidaasi oo kale ayuu xidhiidh uga dhexeeyaa geeraarka, maroodi maroodi, baarcaddaha iyo buraanburkana. Waxa kale oo uu xidhiidh la yaab lihi ka dhexeeya heesaha: wiglo, hirwo, dhaanto iyo heello. Bal u fiirso labadan tuduc ee hoos ku qoran:

Hadduu ballankii dhab kaa yahay

(**1**) 2 1 1 2 (**1**) 2 1 1 = **12**

Biyaan jirin been ku soo sheeg *

(**1**) 2 1 1 2 (**1**) 2 2 = **12**

Labadaasi tuduc waa heesta loo yaqaan wiglo. Haddii aan labadaa tuduc mid kasta hal shaqal oo dheer gadaal ka raacinno waxay isu rogeysaa heesta la yidhaa hirwo. Tusaale ahaan:

Hadduu ballankii dhab kaa yahayeey

(**1**) 2 1 1 2 (**1**) 2 1 1 2 = **14**

Biyaan jirin been ku soo sheegeey *

(**1**) 2 1 1 2 (**1**) 2 2 2 = **14**

Sidaasi baan, haddaba, arrintaana ugu loo qorikarnaa qaab xisaabeedkan hoos ku qeexan ee ah:

**Hirwo = Wiglo + 2 ama**

**Wiglo + 2 = Hirwo**

Haddii tuduc kasta oo hirwo ah hal shaqal-dheere laga hormariyo maxaa soo baxay?

Naa, Hadduu ballankii dhab kaa yahayeey

(2) 1 2 1 1 2 (**1**) 2 1 1 2 = **16**

Hooy, biyaan jirin been ku soo sheegeey *

(2) 1 2 1 1 2 (**1**) 2 2 2 = **16**

Waxa soobaxay ee ay noqotay wa dhaanto. Waxana loo qorikaraa qaabxisaabeedkani ah:

**2 + Hirwo = Dhaanto**

Hadal iyo dhammaantii, waxan halkaa ka soo tuujinaynaa in qaaciidooyinkaasi loo rogikaro ama lagu qorikaro qorme kumbuyuutar.

**4. Maansooyinka bado aanay ahayn lagu sheegay iyo sida miisaanku wax uga tarayo:**

Waxannu soo tibaaxnay in maansooyinka laysku murgiyo oo gabay geeraar lagu sheego ama jiifto gabay lagu tilmaamo. Inay arrintaasi jirto waxa marag kuugu filan maansadan hoos ku qoran. Maansadani oo uu tiriyey Xuseen Dhiqle ayaa lagu sheegey iney gabay tahay ( Aw Jaamac Cumar Ciise 1999:28).

*Dhurwaa adhiga Eebbaa leh*
*Eebbiyo Ustaadkaa leh*
*Oo niman dableyaa leh*
*Oo niman ku dili baa leh*
*Waa niman Daraawiisha*
…………………………



Haddii aan, haddaba, is nidhaa ha la kala ogaado maansadaasi badda ay tahay, ama badda ay ku abtirsato, laba arrimood mid ahaan baa la yeelikarraa. Ta u horraysa waxan eegikarraa muuqaalka guud. Waxana maansada la barbar dhigikaraa maanso la yaqaan badda ay ka soo jeeddo. Tusaale ahaan haddii aan dhawr tuduc ka soo qaadanno gabaygii Cumar Usteeliyo ee ahaa:

*Adhi waa dhallaan iyo haween dhimiradiisiiye*
*Dhaldhalaalka iyo ciirtu waa dhuubka karameede*
*Dhaqaalaa haweenkiyo guriaha siima dhaafsana e*
*Lo'da dhiiqda laga maala iyo dhayda iyo xoorku*
*Dhudhunkay biyaa kula jirtiyo dharabka weeyaane*

Waxad arkaysaa in maansada Xuseen Dhiqle ay, dhanka muuqaalka, ka gaabantahay ta Cumar Usteeliyo. Kol haddii ay sidaa u kala geddisan yihiinna waxa innoo cad inaanay isku qaab dhismeed ahayn. Sidaasi awgeed lama odhan karo maansada Xuseen Dhiqle waa gabay. Ta labaadi waa innaga oo adeegsanna Miisaankii Maansada (Maxamed Xaashi

Dhammac 1976), taasi oo aan si fudud uga arkikarro kala duwanaanshaha labada qaab dhismeed si hawlyarna u garan karro badda ay mid kastaa ka soo jeeddo. Haddii aynu haddaba adeegsanno miisaanka waxay u qormayaan sidan hoos ku qeexan (Dhaxeelreeb 2007):

Adhi waa dhallaan iyo haween dhimiradiisiiye[1]
1 1 2 (**1**) 2 1 1 (**1**) 2 1 1(**1**) 2 2 (1) = 20

Dhaldhalaalka iyo ciirtu waa dhuubka karameede
1 1 2 (1) 1 1 2 (1) 2 2 (1) 1 1 2 (1) = 20

Dhaqaalaa haweenkiyo guryaha siima dhaafsana e
1 2 2 (1) 2 1 1 (1) 1 1 2 (1) 2 1 1 (1)= 21

Lo'da dhiiqda laga maala iyo dhayda iyo xoorku
1 1 2 (1) 1 1 2 (1) 1 1 2 (1) 1 1 2 (1) = 20

Dhudhunkay biyaa kula jirtiyo dharabka weeyaane
1 1 2 (1) 2 1 1 (1)1 1 1 1 (1) 2 2 (1)= 20

Ta Xuseen Dhiqlana waxay u qormaysaa sidan hoos ku qoran:

*Dhurwaa adhiga Eebbaa leh*
1 2 1 1 (**1**) 2 2 1 = 11

*Eebbiyo Ustaadkaa leh*
2 1 1 (**1**) 2 2 1 = 10

Oo *niman dableeyaa leh*
2 1 1 (**1**) 2 2 1 = 10

Oo *niman ku dili baa leh*
2 1 1 (**1**) 1 1 2 1 = 10

*Waa niman Daraawiisha*
2 1 1 (**1**) 2 2 1 = 10

…………………………………

1 Shaqallada labada bilood ku dhexjiraa waa 'xundhuro'. Markuu tuduca gabaygu 20-le yahay xundhur kasta afar shaqal baa ka hormara. Kolka uu 21-le yahayse xundhurta u horreysa oo qudha ayey shan shaqal ka hormaraan.

Waxan halkaa ka garan karraa inaanay maansadaasi ahayn gabay ee ay tahay jiifto sagaalley iyo tobanley hal shaqal gadaal laga raaciyey, taasi oo ka dhigtay iney maansadu la qaab dhismeed noqoto heesta caanaha lagu lulo ama ta maqasha dacawada lagaga jiro (Gaarriye 1976). Bal adiguba maansadaa iyo heesahan hoos ku qoran isu foodi:

| | |
|---|---|
| *Naa hooy dayooy hee dheh* | 2 1 1 (**1**) 2 2 **1** |
| 2 2 (**1**) 2 2 **1** | Waa lay dilaayaaye |
| *Dayo Faaraxeey hee dheh* | 2 2 (**1**) 2 2 **1** |
| 1 1 2 (**1**) 2 2 **1** | Waa lay dabaayaaye |
| *Faadfaatisooy hee dheh* | 2 2 (**1**) 2 2 **1** |
| 2 2 (**1**) 2 2 **1** | Hay soo dhowaan dhoosey |
| Faadumo Ardooy heedheh | 2 2 (**1**) 2 2 **1** |

Heesta caanuhuna waxay ahayd haddii aan idin xasuusiyo:

Haan yahay qabooy qoor yar
2 1 1 (**1**) 2 2 **1**
*Ma fayoobid oo ogiye*
1 1 2 (**1**) 2 1 1 **1**
*Ma furtaa lagaa dhuugey?*
1 1 2 (**1**) 2 2 **1**

Sidaasi oo kale ayaa maansooyin uu tiriyey Ina Cabdalla Xasan loogu sheegay gabay (Aw Jaamac Cumar Ciise 1999:191). Waxa kale oo halkaasi innooga cad inaan aragtidii miisaanka loo adeegsan agab ahaan, wax laga taransadayna aysan u jirin.

Maanso kasta oo qalabka la tumo lagu garaacaa waa hees. Hayeeshee, midhaha maansadu waa jaad ka mid ah badaha maansooyinka ee kala duwan. Waxase jirta inaan dadku sidaa u kala aqoon. Tusaale ahaan, weli ma lays weydiiyey heesta la yidhaa *Suleekha* ee uu *tiryey Maxamed Ibraahin Warsame 'Hadraawi'* badda ay ka soo jeeddo? Waxan hubnaa inaan weli weydiintaasi lays weydiin. Arrintu siday doontaba ha ahaatee bal aan heestaa ku nasanno oo eegno badda ay ka soo jeeddo. Haddii aannu nidhaa heestu waxay ka kooban tahay laba badood oo isku dhafan dad baa yaabi. Runtuse waxay tahay inay heestaasi ka kooban tahay laba badood. Qaybta hore oo

ka soojeedda badda loo yaqaan *Baarcaddaha* iyo qaybta labaad oo ka soo jeedda badda *Geeraarka*. Si aannu arrintaa u caddayno waxan adeegsanaynaa aragtidii miisaanka maansada ee Gaarriye sida hoos ku qeexan:

*Idaa subag laga lulaa*
(1) 2 1 1 1 1 (1) 2
*Lo' baa saan laga baxshaa*
(1) 2 2 1 1 (1) 2
*ge(e)l baa sidig loo ogaa*
(1) 2 1 1 2 (1) 2
*sengaan orod lala ekayn*
(1) 2 1 1 1 1 (1) 2
sareedo Ilaahay baa leh
(1) 2 1 1 2 (1) 2 1

*hablaa Soomaaliyeedna*
(1) 2 2 2 (1) 2 1
*haddaan quruxdooda saanyo*
(1) 2 1 1 2 (1) 2 1
*haddaan miisaanka saaro*
(1) 2 2 2 (1) 2 1
*sagaal tobankii adaa leh.*
(1) 2 1 1 2 (1) 2 1

\

Qaab dhismeedkaasi bal aan u foodinno kii heesta baarcaddaha ee tidhaa:

Hiyeeleeleey hiyee
(1) 2 2 2 (1) 2
Habluhu gaaggaabanaa
(1) 1 1 2 2 (1) 2

Ma galabbay wada dhasheen
(1) 1 1 2 1 1 (1) 2
Ma gudin baa lagu sarjaray
(1) 1 1 2 1 1 (1) 1 1

Hadal iyo dhammaantii, miyaanay labadaa qaab-dhismeed isku mid ahayn? Sidaasi oo kale haddii aan qaybta dambana ku adeegsanno aragtidii miisaanka maansada waxa innoo soobaxaya inay geeraar tahay. Tusaale ahaan:

*Suleekhaay araggaagu*
1 2 * 2 1 1 2* 1
*nafta waw samirsiiso*
1 1 *2 1 1 2 *1
*saddex bay ku qaddaaye.*
1 1 * 2 1 1 2 *1
*ha ka goynin salaanta*
1 1 * 2 1 1 2 * 1

*Sansaankaagiyo jaaha*
1 2 * 2 1 1 2 * 1
*sarajoogiyo tooska*
1 1 * 2 1 1 2 * 1
*dhexda soohane tooxda*
1 1 * 2 1 1 2 * 1
*sayn fardoodda ka dhuuban*
2 1 * 2 1 1 2 * 1

Geeraarkina waa kane bal adiguba barbardhig:

| | |
|---|---|
| *Saaxirkii kala guurraye* | Aan siduuyahay eego e |
| 2 1* 2 1 1 2* 1 1 | 2 1 * 2 1 1 2* 1 1 |
| Sarreeyow ma nusqaamow | Kaana siib kanna saar |
| 1 2* 2 1 1 2* 2 | 2 1* 2 1 1 2* |

Waxa kale oo halkaasi innooga cad inaan aragtidii miisaanka loo adeegsan agab ahaan, wax laga taransadayna aysan jirin.

**5. Sidii uu Laaxinjire ku dhashay?**

Kolkii aannu ogaannay in xidhiidhka ka dhexeeya badaha maansooyinku yahay qaab-xisaabeed la raacikaro, iyo markii aannu yaqiinsannay in miisaankana loo adeegsankaro ama uu yahayba agab lagu sixikaro laaxinka, laguna kala ogaankaro jaadadka kala duwan ee badaha maansooyinka ayey noo caddaatay in loo rogikaro qorme kumbuyuutar. Waxa kale oo aannu is dareensiinney in inta la baranayo iyo inta laga niibgaadhayo miisanka, si wax loogu saxaa, ay qaadanayso muddo aad u dheer. Dadka inta kartidaa iyo samirka intaa leeg lihina ay aad u yartahay. Waxa kaloonnu isdareensiinnay inay adagtahay ama ay xilli badan oo maalmo ku siman qaadanayso haddii lays yidhaa gacanta ha lagu saxo maanso dherekeedu yahay 800 oo tuduc. Sidaasi darteed, waxaan tallan ku jirin in dhibaatadii aan ka hadlayney ay sidii u jireyso. Waxa markaa lagama maarmaan noqotay inaan isla eegno sidii loo helilahaa tab ku dhisaalan aragtidan oo si fudud loo adeegsan karo.

Hadal iyo dhammaantii, waxay talo isugu soo ururtay in aragtidan loo rogo qorme kumbuyuutar kaasi oo ay cid waliba adeegsankarto. Arrintaasi dad badan bay riyo ula ekoonaatay. Qof kasta oo aannu talo bidnayba intuu na eegay buu naga dhaqaaqay. Waxaannu riyadaa ku jirnaba aragtidayadi way dhabawdey.

**6. Laaxinjire waa maxay?**

Laaxinjire waa qorme kumbuyuutar oo ku dhisaalan aragtida Miisaanka Maansada looguna talagalay inuu saxo laguna kala asooro badaha kala duwan ee maansada Soomaaliyeed.

**Muxuu soo kordhiyey**:

- Ninkasta oo maanso curiya gefkiisa si hawl yar baa loo ogaan karayaa, taasi oo waagii hore adkayd.
- Xawaaraha uu wax ku shirrabayo oon wax loo dhigaa jirin. Inkasta oo ay ku xidhantahay jaadka kumbuyuutarka la adeegsanayo. Tusaale ahaan, maansada Dabataxan ee uu tiriyey Maxamed Xaashi Dhamac ‘Gaarriye’ oo ka kooban 549 tuduc wuxu ku shirrabayaa wax daqiiqad ka yar.
- Badihii maansooyinka oo si fudud loo kala garankarayo.
- Dhanka gefefka higgaadda oo uu wax weyn ka qabanayo.
- Qof kastaa wuu adeegankarayaa, hadduu yahay abwaan iyo haddaanu weligii laba erey isu keenin.

**Jaadadka gefefka uu laaxinjire qabanayo:**

Laaxinjire looma adeegsanayo kala asooridda jaadadka maansooyinka oo qudha ee waxa loo adeegsankaraa sixidda gefafka ama laaxinka gala maansooyinka kolka la qorayo. Tusaale ahaan, bal u fiirso tuducyadan hoos ku qoran:

a. Duur-xuli aan maayee ( laaxin baa ku jira).
b. Duur-xuli an maayee ( laaxin kuma jiro).
a. Dawgoo aan seegnaan (laaxin baa ku jira).
b. Dawgoo an seegnaan (Laaxin kuma jiro).
a. Stanzaw nin doorkaa ( laaxin baa ku jira).
b. Istansaw nin doorkaa (laaxin kuma jiro).
a. Dulmigii lafaa dhuuxaybaad dib u dhardhaarteene (laaxin baa ku jira).
b. Dulmigii lafaa dhuuxay baad dib u dhardhaarteene (laaxin kuma jiro).

Ugu dambayntii, qoraalkan waxaannu kaga hadlaynay dhibaatooyinkii haystay maansada Soomaaliyeed intii aan afka la qorin iyo sida kolkii afka la qoray wax badan oo waxtar leh loo soo kordhiyey sida miisaanka maansada. Waxa kale oo aannu tilmaan kooban ka bixinnay sida xidhiidhka ka dhexeeya badaha maansooyinku ugu salaysan yihiin qaab xisaabeed si qumman kuu hagaya. Waxa kale oo aannu soo hadal qaadnay sida uu miisaanku u yahay agab

loogu adeegsan karo kala asooridda badaha maansooyinka laysku murgiyo. Mar kale waxaannu tibaaxnay sida aragtiyahaasi loo casriyeyn karo oo loogu rogikaro qorme kumbuyuutar, kaasi oo ay cid kastaa si hawl yar u adeegsan karto. Si aan madmadow lahayn waxannu u guud marnay sida loo adeegsanayo iyo dhibaatooyinka uu wax ka qabanayo. Hadal iyo dhammaantii waxan aragtidan ku tilmaamikarraa mid wax weyn ku soo kordhisay afka iyo suugaanta Soomaaliyeed, aqoon yahanno badanna xaradhaamindoonta si ay hawshan halkaasi uga sii ambaqaadaan.

# Raadraac

Aw Jaamac Cumar Ciise, Diiwaanka Gabayadii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, daabacaadda 2aad, 1999, Neyroobi

Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale', Miisaanka Maansada Soomaaliyeed, 2004, Sweden.

**—,** "Hawraarey Ninba Si Kuu Qaaday," *Xiddigta Oktoobar* 6:119 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 10 June, 1978): 3.

---, "Hawraarey Ninba Si Kuu Qaaday: Qabta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6: 120 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 11 June, 1978): 3.

---, "Gabaygeenna Miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6)26 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information national Guidance, 18 June, 1978): 3.

---, "Gabaygeenna Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:134 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 28 June, 1978): 3.

---, "Jiiftadana Miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6:149 (Mogadishu,' Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 16 July, 1978): 3.

---, "Jiiftadana Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:150 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 17 July, 1978): 3.

---, "Dhaantadana Miisaan,"*Xiddigta Oktoobar* 6:164 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information national Guidance, 2 August, 1978): 3. [For the second half of this article, see under "Suugaanta Soomaaliyeed.

---, "Suugaanta Soomaaliyeed: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:165 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 3 August, 1978): 3. [For the first half of this article, see under' 'Dhaantadana Miisaan. "

---, "HeeIladana miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6:172 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 12 August, 1978): 3.

---, "Heelladana Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:173 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 13 August, 1978): 3.

---, "Geeraarka iyo Miisaankiisa," *Xiddigta Oktoobar* 6: 190 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National.Guidance, 2 September, 1978): 3.

---, "Geeraarka iyo Miisaankiisa: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6: 191 Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 3 September, 1978): 3.

---, "Buraanburka iyo Miisaanki.isa,"*Xiddigta Oktoobar* 6:247 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 8 November, 1978): 3. [For the second half of this article, see under "Hojis iyo Hooris Buraanbur.

---, "Hojis iyo Hooris Buraanbur," *Xiddigta Oktoobar* 6:248 (Mogadishu, Somalia: Ministry ofInformation and National Guidance, 9 November, 1978): 3. [For the first half of this article, seeunder "Buraanbur iyo Miisaankiisa."

---, *Gorfaynta Maansada [Analysis of Poetry]* (Mogadishu, Somalia: Academy of Culture, Ministry of Higher Education and Culture). [forthcoming]

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Kumaa ah aabbaha miisaanka maansada Soomaaliyeed? Ma Carraale mise Gaarriye? 2006, Dhaxalreeb 3 www.redsea-online.com

---,"Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed." Meey 2007. Dhaxalreeb 3 www.redsea-online.com.

---, "Qaab dhismeedka heesaha: wiglo, hirwo, dhaanto, iyo heello, ( unpublished).

John W. Johnson 'Heello', 'Somali Prosodic System' Horn of Africa Volume 2, No.3 pp. 46-54.

Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye**),** Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 17 January, 1976): 3.

---"Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:2 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 24 January, 1976): 3.

---, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:8 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 31 January, 1976): 3.

---, "Toddobadkan iyo Suugaanta: Miisanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:14 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 7 February, 1976): 3.

---, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:20 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 14 February, 1976): 3.

---, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:55 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 27 March, 1976): 3.

---, "Toodobadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:73 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 17 April, 1976): 3.

---, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:86 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 3 May, 1976): 3.

---, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:90 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 8 May, 1976): 3.

--- ,"Toodbaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4: 108 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and N~,inn~1 Guidance. 29 Mav. 1976): 3.